

KU HANUUNINTA BULSHADA

- ku socota qofka ku cusub Iswiidhan

Jihaynta bulshadu waa kooras ku saabsan bulshada Iswiidhishka ah, waxaana loogu talo galay dadka ku cusub wadanka Iswiidhan. Waxaa lagugu barayaawaxaad xaq u leedahay iyo wixii kaq la guugu leeyahay, ee khuseeya dimuqraadiyadda Iswiidhan iyo sida bulshada iswiidhishku u habaysan tahay. Kooraskani wuxuu ku siinayaa waxbixin muhiim ah – bilow fiican ayey kuu noqonayaa Iswiidhan!

Waxaad ka baranaysaa wax yaabo waaqica ah oo nolol maalmeedka ku saabsan, tusaale ahaan shaqada iyo waxbarashadda, guryaha, caafimaadka iyo daryeelka bukaanka iyo caruurta iyo quyska. Kooraskani wuxuu ku baxayaa luqadaada afka-hooyo ama luqad kale oo aad garanayso. Waad dhagaysanaysaa, waydiinaysaa oo ka doodaysaa. Waana bilaash!

Tusmada kooraska

Sideed mawduuc ayuu kooraska ku jira:

- In Iswiidhan la yimaado
- In Iswiidhan lagu noolaado
- In uu qofku masruufkiisa la soo baxo oo uu horumar ku sameeyo Iswiidhan
- Xuquuqda qofku uu leeyahay iyo waajibaadka saaran
- In uu qofku samaysto faamli oo uu caruur kula noolaado Iswiidhan
- In la saameeyo Iswiidhan
- In caafimaadka lagu daryeelo Iswiidhan
- In lagu gaboobo Iswiidhan

Qofkee ayaa kooraska dhigan kara?

Hanuuninta bushadda waxaana loogu talo galay dadka da'doodu u dhexayso 18 ilaa 64 sannadood, kuna cusub Iswiidhan oo leh

- qorshe loo dejiyey oo lagu meelaynayo
- ama leh dad halkan uga soo horeeyey oo faamligiisa ah (kana diwaan gashan degmo markii ugu horaysa laga bilaabo 1 bisha maarsa 2013)

Ku hagidda arimaha bulshadda lama siinayo dadka sidan ah:

- haddii qofku haysto dhalasho waddamada midowga yurub mid ka mid ah (EES-land), Norway, Island, Liechtenstein iyo Iswiisarland
- dhigto dugsiyadda sare
- ka mid yahay dadka loo soo qaataay inay halkan ka shaqeeyaan
- ka mid yahay ardayda halkan wax ka baranaysa / martida cilmi baadhista halkan ku joogta

Wargelin

Waad isi soo wargelin kartaa adigoo annaga nala soo xiriiraya.

Telefoonka: 0413-281 59 (Gull-Britt Persson, Integrationskoordinator/Ansvarar för modernmålsenheten)

Imaylka: gull-britt.persson@hoor.se

Bogga Internetka: hoor.se/samhallsorientering

Soo dhawow oo nala soo xiriir annaga haddii aad wax su'aala qabto oo ku saabsan kooraskan.

Soo dhawow



Höörs
kommun

Warbixin! www.informationsverige.se waa bog internet ah oo loogu talo galay dadka ku cusub ee Iswiidhan yimi. Halkan waxaad ka akhrisan kartaa wax yaabo ku saabsan bulshada Iswiidhishka ah. Warbixinada oo dhami waxay ku qoran yihiin luqado